



MAAMULKA TALLAALADA COVID-19 MA OGTAHAY?

MAXAY qaadashada talaalku ka kooban tahay? Immisa qiyaasood ayaan u baahan doonaa?

Tallaalka waxaa lagu duraa muruqa gacanta ama bowdada. Si tallaalku si wax ku ool ah ugu shaqeeyo oo uu kahortago fayraska, **laba qiyaasood ayaa loo baahan doonaa in la siiyo qof kasta oo u dhaxeysa ugu yaraan 21 maalmood.** Tani waxay jirka ka caawin doontaa inuu soo saaro jawaab celin buuxda oo difaac ah isla markaana la dagaallamo infekshanka haddii ay dhacdo in la xaleelo fayraska COVID-19.

Qiyaaso ku filan oo tallaalka ah ayaa loo qoondayn doonaa si loo hubiyo in qiyaasta labaad ee qof la siiyaa ay ka tirsan tahay isla shirkadii ay qaadatay tii qiyaastii hore ee la qaatay

Dadka la xanuunsada XASAASIYADDA ma qaadan karaan talaalka COVID-19?

Waxay kuxirantahay nooca xasaasiyadda. Qof kasta oo xasaasiyad daran ku yeeshay walxaha ku jira tallaalka COVID-19 waa inuusan qaadan tallaalka. Tallaalkani waxaa ku jira polyethylene glycol (PEG), oo ah xasaasiyad la yaqaan oo inta badan laga helo daawooyinka iyo sidoo kale alaabada guryaha iyo waxyaabaha la isku qurxiyo. Xasaasiyadaha lagu yaqaan PEG waa mid aad dhif u ah laakiin kuwa ku dhaca xasaasiyaddan waa INEYSAN qaadan tallaalkan.

- Tallaalku waa beed la'aan sidaa darteed waxaa isticmaali kara dadka xasaasiyadda ku leh beedka.
- Tallaalka kuma jiraan wax xayawaan ah ama walxo xayawaan lagasoo qaatay.
- Tallaalka waxaa laga qaataa weel iyadoo la adeegsanayo joojiye caag ah (bromobutyl) oo aan lahayn cinjir sidaa darteed waa u badqab kuwo xasaasiyad ku qaba cinjirka.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan waxyaabaha uu ka kooban yahay tallaalka COVID-19, fadlan booqo: <https://deputyprimeminister.gov.mt/en/health-promotion/covid-19/Pages/landing-page.aspx>

Dadka fal-celin xasaasiyad daran ku yeeshay tallaalka kale ama daaweynta la isku duro waa inay la hadlaan dhakhtarkooda si ay u qiimeeyaan halista. Si kastaba ha noqotee, taariikhda fal-celinta xasaasiyadda fudud ee tallaalka ama daaweynta la isku duro waa inaysan kaa hor istaagin qaadashada tallaalka COVID-19. Dadka qaba falcelinada xasaasiyadeed oo aan la xiriirin tallaalka lagama reebin qaadashada tallaalka COVID-19. Markaad qaadanaysid tallaalka, waxaa lagu ilaalinayaa 15 daqiiqo ka dib haddii ay dhacdo falcelin daran oo xasaasiyadeed oo naadir ah Dhamaan xarumaha tallaalka ayaa loo qalabeeyay inay daaweeyaan falcelinada noocaas ah.

Haddii aad su'aalo ka qabtid haddii aad qaadanaysid tallaalka adiga oo eegaya xaaladdaada caafimaad, waa inaad kala hadashaa GP-gaaga, wac khadka caawinta tallaalka ee COVID-19 lambarka 145 ama u soo dir emayl covid-tallaalka @ gov.mt

UNHCR Malta maaha isha rasmiga ah ee macluumaadkan. UNHCR Malta ayaa tarjuntay macluumaadkan, si ay kuugu suurto gasho inaad ku hesho luqad aad fahanto, isla markaana aad kula wadaagi karto qaxootiga iyo magangalyo-doonka ku sugan Malta.

Wixii dheeraad ah oo la turjumay macluumaadka ku saabsan Tallaalka COVID-19 fadlan booqo

<https://www.unhcr.org/mt/news/covid-19-information-for-malta>.

Xigasho: Agaasinka Horumarinta Caafimaadka iyo Kahortagga Cudurada, Malta

Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan booqo <https://deputyprimeminister.gov.mt/en/health-promotion/covid-19/Pages/vaccines.aspx>. Degelkan si joogto ah ayaa loo cusbooneysiinayaa hadba sida loogu baahdo.